JUQRAAFI : CUTUBKA 8aad : SUAALO&JAWAABO :

1) Waa maxay sohdin siyaasadeed ?

J) Sohdin siyaasadeed waa xariiqmo ka muuqda khariidada korkeeda oo muujiya bedka dhulka dowladda ay ku fuliso awoodeheeda .

2) Qeex Sohdin ?

J) Sohdin waa xariiq udhaxeeya dalalka ballaciisuna uusan ka badneyn dhowr inji ama hal kiloomitir mararka qaar .

3) Qeex Jiid ?

J) Jiid waa goob juqraafi oo leh bed dhirir iyo ballac sida kaymaha iyo lama degaanka .

4) Sheeg labo astaan oo ay ku kala duwanyihiin sohdin iyo Jiid ?

J) #) Jiidu isma beddesho marnaba duruuf walba oo timaada , inta badan waa dabiici .

#) Sohdin waa is beddeli kartaa mar'marna baabi'ikara, waa ilo dabiici ah kama muuqdan inta badan .

5) Sheeg wax yaabaha sababa Unkashada sohdin siyaasadeed ?

J) #) Tirada dadka oo badato #) Heshiisyada dowladaha ay galaan #) Dagaallada

#) Gumeystaha oo qeybiya dowladaha uu gumeysta .

6) Sheeg heerka qorsheynta sohdin siyaasadeed ?

J) Qeyxid iyo qorsheyn , Go'aamin , Tilmaamid , Maamulidda xadka .

7) Sheeg shaqooyinka sohdin siyaasadeed ?

J) #) kala saaridda dalalka #) ilaalinta amniga #) ilaalinta dhaqaalaha #) Shaqo siyaasadeed iyo sharciyada dadka .

8) Tilmaan noocyada Xudduuda siyaasiga ah ?

J) Waa labo nooc oo kala ah : #) Xudduud dabiici ah iyo #) Xudduud aadanaha laxariirta .

9) Sheeg labada nooc ee Xudduuda aadanaha la xariirta ?

J) #) Xudduud ilbaxnimo #) Xudduud handasi ah .

10) Tilmaan qeybaha Xudduuda dabiiciga ah ?

J) #) Xudduud buuro ah #) Xudduud wabi ah #) Xudduud haro ah #) Xudduud bad ah .

11) Sharax ka bixi xadka u dhaxeeya Soomaaliya iyo Jabuuti ?

J) Soomaaliya waxay xad aad u gaaban la wadaagtaa dalka Jabuuti kaa oo gaaraya dherar ahaan 58km, asalka xudduuda u dhaxeysa soomaaliya iyo Jabuuti waxay ku saleysan tahay heshiis ay wada galeen Faransiiska iyo Ingiriiska sanadkii 1888 CD .

12) Sharax ka bixi xadka u dhaxeeya Soomaaliya iyo Kiinya ?

J) Soomaaliya waxay dhanka koonfureed xudduud dheer kala wadaagtaa dalka Kiinya , xadkaa oo gaaraya dherar ahaan 678km, xadka u dhaxeeya soomaaliya iyo Kiinya wuxuu asal ahaan ku saleysan yahay heshiis dhex maray Ingiriiska iyo Talyaaniga sanadkii 1924 CD .

13) Sharax ka bixi xadka udhaxeeya Soomaaliya iyo Itoobiya ?

J) Soomaaliya waxay dhanka galbeed xudduud dheer kala wadaagtaa dalka Itoobiya xadkaa oo gaaraya dherar ahaan 1590km, xudduuda u dhaxeysa Soomaaliya iyo Itoobiya waxay dhalatay 1887 CD , xilligaa oo ay Itoobiya la wareegtay magaalada Harar , iyo dhulka intiisa kale ee soomaali galbeed sanadkii 1889 CD , sanadka markuu ahaa 1948 CD Ingiriisku wuxuu aqoonsaday in dhulkaas uu ka tirsan yahay dalka Itoobiya .

W/Q : Al-ustaad Abayle .